



P:(1) 614-783-1937  
E:[info@bulshotrust.org](mailto:info@bulshotrust.org)  
W:[www.bulshotrust.org](http://www.bulshotrust.org)

## Baaqa Shirweynaha Bulsho Trust 2025

### Mowduuca: “DHISIDDA HESHIIS DOORASHO OO HORSEEDA XASILLOONI SIYAASADEED”

**Hilton Columbus at Easton, Columbus, Ohio, USA**

**Sebteembar 7, 2025**

Machadka Daraasaadka Bulsho Trust ayaa martigeliyay shir aqoon-is-weydaarsi ah oo socday labadii cisho ee u dhexeyssay 6–7 Sebteembar 2025. Shirweynaha oo ka dhacay magaalada Columbus ee dalka Maraykanka waxaa ka soo qaybgalay:

- Aqoonyahanno Soomaaliyeed oo soo bandhigay daraasado ku saabsan arrimaha doorashooyinka
- Madax Soomaaliyeed oo ay ka mid yihiin xildhibaanno, wasiirro heer federaal iyo dowlad goboleed
- Madaxweynayaal hore iyo murashaxiin u taagan madaxtinimada Soomaaliya
- Diplomaasiyiin iyo khubaro aqoon durugsan u leh arrimaha doorashooyinka
- Aqoonyahanno Soomaaliyeed oo si weyn looga yaqaan gudaha iyo dibadda dalka

Halkudhingga shirweynahu wuxuu ahaa: Raadinta heshiis doorasho si looga baaqsado xasilooni darro ka dhalata doorasho aan lagu heshiin ama muddo kororsi sharci darro ah.

### **Doodaha iyo Soo Bandhigidda Taariikhda Doorashooyinka**

#### **Shirka waxaa lagu soo bandhigay:**

- Taariikhda doorashooyinka Soomaaliya laga qabtay xilligii maxmiyadda (1956, 1959), xilligii xorriyadda (1960, 1964, 1969), iyo geeddi-socodka Jamhuuriyadda Sadexaad (2000–2025)
- Cawaaqibta xun ee ka dhalata natijadada doorashooyin la muqumaasaqay.
- Xaaladda siyaasadeed ee haatan taagan iyo khataraha imaan kara



P:(1) 614-783-1937  
E:[info@bulshotrust.org](mailto:info@bulshotrust.org)  
W:[www.bulshotrust.org](http://www.bulshotrust.org)

- Talooyin ku saabsan sidii loo qaban lahaa doorasho heshiis lagu yahay oo ku dhacda waqtigeeda sanadka 2026

Aqoonyahanno Soomaaliyeed ayaa soo jeediyay xulashooyin cusub oo lagu qaban karo doorashooyin ka horumarsan kuwii hore. Waxaa la qabtay shan dood cilmiyeed oo diiradda lagu saaray arrimaha doorashooyinka, waxaana ka qaybgalay khubaro iyo madax aqoon durugsan u leh mawduucyada miiska saarnaa.

## **Talooyinka Shirweynaha Ka Soo Baxay**

### **1. Xaaladda Waqtiga iyo Amniga:**

Iyadoo la tixgelinayo waqtiga kooban ee ka harsan muddo xileedka xukuumadda, khilaafka siyaasadeed ee u dhexeeya dowladda federaalka, dowlad goboleedyada iyo mucaaradka, iyo xaaladda amni ee dalka, shirweynuhu wuxuu isku raacay in aysan suurtagal ahayn in la qabto doorasho qof iyo cod ah sanadka 2026.

### **2. Dastuurka 2012:**

Shirku wuxuu ugu baaqayaa dowladda federaalka in ay dib ugu noqoto dastuurka la isku waafaqay ee 2012 si loo diyaariyo heshiis doorasho oo ay ka qayb yihiin dowlad goboleedyada ka maqan wadatashiga.

### **3. Wadar-ogol Siyaasadeed iyo Doorasho La Isla Ogol Yahay:**

Shirweynuhu wuxuu isla qaataay in loo baahan yahay wadar-ogol siyaasadeed oo horseed u noqda heshiis doorasho oo loo dhan yahay. Doorashada la isku raacayo waa in ay noqoto mid:

- a). Ka horumarsan doorashooyinkii hore ee dadban, si loo helo hannaan mataalaad leh
- b). La kordhiyo tirada degmooyinka codbixintu ka dhacayso, si loo ballaariyo mataalaadda juqraafiyeed
- c). La badiyo tirada codbixiyayaasha , si loo kordhiyo ka-qaybgalka bulshada.



P:(1) 614-783-1937  
E:[info@bulshotrust.org](mailto:info@bulshotrust.org)  
W:[www.bulshotrust.org](http://www.bulshotrust.org)

- d). Xaqijineysa daahfurnaanta iyo hufnaanta doorashada, si loo dhiso kalsoonida dadweynaha
- e). Damaanad qaadeysa rabitaanka shacabka ee matalaadda, si codka shacabka u noqdo mid saameyn leh.
- f). Fursad siman siineysa dhammaan murashaxiinta, si tartanku u noqdo mid caddaalad ah
- g). Ilalineysa xuquuqda haweenka iyo naafada, si loo xaqijiyo matalaad bulsho oo loo dhan yahay
- h). Yareyneysa musuqa iyo xadgubyada kale, si loo ilaaliyo hufnaanta doorshada iyo xasiloonda
- i). Kordhineysa tayada hay'adaha qaran iyo sumcadda dowladnimada, si loo xoojiyo kalsoonida shacabka iyo beesha caalamka

#### **4. Wacyigelin Bulsho iyo Abaabul Wadatashi:**

Shirku wuxuu ugu baaqayaa ururrada siyaasadda, bulshada rayidka, haweenka, dhallinyarada, odayasha dhaqanka, iyo jaaliyadaha dibadda in ay ababulaan shirar looga hadlayo ahmiyadda heshiis doorasho si looga baaqsado muddo kororsi sharci darro ah iyo doorasho hal dhinac ah oo keeni karta muran iyo colaad.

#### **Gabagabo iyo Baaq**

Shirweynaha Bulsho Trust wuxuu adkaynayaa baahida loo qabo heshiis doorasho oo ku dhisan wadaxaajood iyo isu tanaasul dhex mara dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Indheergaradka ka soo qaybgalay shirweynuhu waxay ugu baaqayaan madaxda labada heer ee dowladda Soomaaliya in ay ahmiyad siiyan wadaxaajood si loo helo doorasho heshiis lagu yahay oo ku qabsoomi karta inta ka harsan muddo xileedka xukuumadda.

~DHAMAAD~